DOWLADDA KOONFUR
EE SOOMAALIYA
WASAARADDA WARFAAFINTA WACYI
GELINTA BULSHADA

ولاية جنوب غرب الصومال
وزارة الاعلام وإرشاد المجتمع

**SOUTHWEST STATE OF SOMALIA**
MINISTRY OF INFORMATION & SOCIAL
MOBILZATIOM

**Ref: MOINFO-0022/12/2015** **28/12/2015**

**WAR-MURTIYEED AY SOO SAAREEN GOLAHA WASIIRADA DOWLAD GOBOLEEDKA KOONFUR GALBEED SOOMAALIYA**

Maanta oo ay taariikhdu tahay *28ka December 2015,* waxaa Shir isugu yimid Golaha Wasiiradda ee Dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed Soomaaliya, kaasoo uu shir guddoominaayay Madaxweynaha Mudane Shariif Xasan Sheekh Aadan.
Qodobada looga hadlay Shirka waxaa kamid ahaa: Amniga Deegaanada Koonfur Galbeed iyo Miisaaniyadda Dowladda ee sannadka 2016.
Waxaa sidoo kale Goluhu isla soo qaaday jawaabtii laga bixin lahaa hadalkii ka soo yeerey maamulka Cabdiweli Gaas ee uu ku taageerey dad qaswadayaal ah oo uu soo dirsaday iney qas iyo xasilooni daro ka abuuraan magaalada Ceelberde ee gobolka Bakool.

Maamulka *Cabdiweli Gaas* kadib markuu ogaaday in Qorshahiisa sedbursiga ku dhisan aanu ka gadmeynin Bulshada Soomaliyeed ayuu rabaa inuu abuuro qas.

Gabagadii waxuu Golahu ka soo saaray Warmurtiyeed ay kaga jawaab celinayaan falalka guracan ee uu wado Maamulka Qabyaaaladda ku dhisan oo uu hoggaaminayo *Cabdiweli Maxamed Cali Gaas.*

**Waxaaan ugu baaqaynaa:**

- Inuu ka waantoobo maamulka *Cabdiweli Gaas* hurinta colaadaha sokeeye iyo kala geynta Shacabka Soomaaliyeed ee uu ka wado deegaanada deriska la ah iyo isku daygiisa inuu u soo raro colaadahaas qabyaaladeysan dhulka Dowlad Goboleedka koonfur Galbeed Soomaaliya.
- Waxaan xasuusineynaa Maamulka *Cabdiweli Gaas* in uu ilaaliyo nidaamka dowliga ah, waxaana u sheegeyna in dowlad Goboleedka Koonfur Galbeed diyaar u tahay in ay ilaaliso midnimada iyo wadajirka shacabka Koonfur Galbeed.
- Waxaan u soo jeedinaynaa Shacabka koonfur Galbeed in ay ilaashadaan midnimadooda iyo wadajirkooda kana digtoonaadaan wixii u keeni kara kala qaybsanaan iyo tafaraaruq.

**Tel: +252619787878 | Email: moinfo@iswa.so | Baidoa, Somalia**